Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

AGING AND LONG-TERM SUPPORT ADMINISTRATION
PO BOX 45600
OLYMPIA WA 98504-5600

# Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn: Xuquuqdaada

**Adult Protective Services: Your Rights**

Waxaad xaq u leedahay in aadan la kulmin ka dayrin, xadgudub, dhiigmiirasho maaliyadeed, iyo dayac. Haddii ay jirto sabab la aamini karo oo ah aad la kulantey ka dayrin, xadgudub, dhiigmiirasho maaliyadeed, ama dayac, waxaad xaq u leedahay:

1. In aad warbixin u soo gudbiso Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo sharci fulinta iyo in aad la wadaagto macluumaad kasta ee aad aaminsan tahay in ay ku habboon yihiin baaritaanka waxaadna tilmaantaa ama aqoonsataa shakhsiyaad kasta ee aad aaminsan tahay in ay hayaan macluumaad ku habboon.
2. In aan laguu geysan aargoosi loo sababeynayo ka-warbixinta ama soo gudbinta warbixinta ka dayrinta, xadgudubka, iyo dhiigmiirasho maaliyadeed, ama dayaca.
3. In lagugu la dhaqmo si sharaf leh iyo in lagugu la hadlo luuqad ixtiraam ku dheehan marka lagu la hadlayo.
4. Daboolidda baahiyaha macquulka ah ee naafonimadaada marka aad ka warbixinayso, iyo inta lagu guda jiro nidaamka baaritaannada iyo maamulka.
5. In aad codsato amar ka mamnuucaya qof walba oo kaa dayriyay, kugu xadgudbay, kugu la kacay dhiigmiirasho maaliyadeed, ama ku dayacay in uu gurigaaga joogo, in uu kula soo xiriiro, ama in uu adeegsado lacagtaada ama hantidaada.
6. In aad DSHS ka hesho macluumaad iyo gudbinnada habboon ee hay'adaha kale ee kuu qareemayn karo, baaritaanta sameyn kara, ama tallaabo qaadi kara.
7. In lagugu soo wargeliyo xaaladda baaritaanada, nidaamyada, tallaabooyinka maxkamadda, iyo natiijooyinka hay'adda gacanta ku haysa kiis kasta oo aad dhibbane ka tahay.
8. In aad codsato soo gudbinnada u-qareemaynta ama gargaar sharci si aad gacan uga geysato qorsheynta bedqabka, baaritaannada, iyo dhageysiyada.
9. In aad si rasmi ah ama si aan rasmi ahayn cabasho ugu gudbiso DSHS, oo ku saabsan baaritaannada ama nidaamyada, ka-dibna aad ka hesho jawaab degdeg ah.

**Si aad u soo gudbiso warbixin xadgudub, ka dayrin, dayac, is-dayacid, ama dhiigmiirasho maaliyadeed, ama si aad macluumaad u weyddiisato, wac:**

**Cod Qabashada Dhexe/TTY La Heli Karo 1-877-734-6277 / TTY 1-833-866-5595**

**1-866-EndHarm (1-866-363-4276)**

Macluumaadka Xiriirka Qoyska: